MACLUUMAAD KU SAABSAN ciyaaraha lacagta (khammaarka)

Hadiya -hanke

Maxaa loola jeedaa ciyaaraha lacagta (khammaarka)?

Ciyaaraha lacagta waa ciyaaro lagu ciyaaro lacag. Ciyaaraha lacagta waa ay noocyo badan yihiin. Tusaale ahaan waxaa ciyaaraha lacagta ka mid ah:

- Bakhtiyaanasiibka la xoqo sida bakhtiyaanasiibka Ässä (Ässä-arpa)
- Ciyaaraha kasiinada sida pokeri
- Ciyaaraha bakhtiyaanasiibka sida Lotto iyo Keno
- Ciyaaraha bakhtiyaanasiibka iyo khammaarka sida Toto
- Ciyaaraha lacagta ee mishiinnada ootomaatiga ah sida ciyaarta khudaarta

Ciyaaraha lacagta waxaa lagu ciyaari karaa meelo kala duwan.

Mishiinka ciyaaraha ee ootomaatiga ah wuxuu dhexyaallaa xarumaha dukaamada, kiyooskiyada, xarumaha batroolka iyo baararka. Sidoo kale ciyaaraha lacagta waxaa lagu ciyaari karaa hoolalka ciyaarta, halkaasoo ay ka jiraan noocyo kala duwan oo ciyaaraha lacagta ah.

Kiyooskiga waxaad ka gadan kartaa khammaarka bakhtiyaanasiibka iyo natiijooyinka ciyaaraha kubadda cagta. Kiyooskiga iyo dukaamada waxaa laga iibsan karaa bakhtiyaanasiibka, waxaana lagu ciyaaraa lootada.

Ciyaaraha lacagta waxaa lagu ciyaaraa tusaale ahaan internetka iyo telefoonka gacanta.

Xittaa ciyaaraha digitaalka waxaa ku baxa lacag, inkasta oo marka hore ay yihiin lacag la'aan. Lacagta waxaa ay ku baxaysaa, sabatoo ah waa in ciyaartoyda la soo iibsado, si uu ciyaarta u galo. Kharashka ciyaarta waxaa lagu soo darayaa qaansheegadka ama biilka telefoonka gacanta. Ciyaarta dijitaalka waxaa lagu ciyaari karaa telefoonka gacanta, internetka iyo qalabka lagu ciyaaro ee telefishanka lagu xiro (pelikonsoli).

Waa maxay sababta aan u ciyaaraynno ciyaaraha lacagta?

Dadku waxaa ay ciyaaraan ciyaaraha lacagta, waayo waxaa ay ciyaarahaas ka helaan xiiso iyo madadaalo.

Qaar badan oo dadka ka mid ah waxaa ay ciyaaraha lacagta u ciyaaraan, waayo waxaa ay ku riyoonayaan, in ay ka taajiraan. Sida dhabta ah ciyaaryahanka marmar dhif ah ayuu ku guuleystaa ciyaaraha lacagta. Inta badan si lama filaan ah oo kaliya ayaa loogu guuleystaa ciyaaraha lacagta. Xirfad ama tababar ku qaadasho waxba kaama caawinayaan inaad ku guulaysato ciyaarta.

Ciyaaraha lacagta waxaa loo qorsheeyay qaabka ah, in qolada soo diyaarisay ciyaartaan ay yihiin kuwa ugu dambaynta guulaysanaaya marwalba.



Waa maxay sababta ay dhallinyardu u xiiseeyaan ciyaaraha lacagta?

- Dhallinyaro badan waxaa ay u haystaan, in ciyaarta lacagta ay tahay mid xiiso leh.
- Qofka dhallinyarada ah wuxuu u ciyaaraa ciyaartaan, sababtoo ah saaxiibbada xittaa way ciyaaraan.
- Qofka dhallinyarada ah wuxuu ku riyoonayaa, in ciyaaraha lacagta uu ka taajiraayo.
- Qodka dhallinyarada ah wuxuu u malaynayaa, in uu yaqaanno natiijada ugu saxsan ee ciyaaraha lacagta. Sida dhabta ahna ma jiro qof yaqaanna natiijadda xaqiiqda ama dhabta ah.
- Qaarkood waxaa ay u ciyaaraan, sababtoo ah hore ayay carruurnimadoodii u soo ciyaareen.
- Qaarkood waxaa ay u ciyaarayaan, sababtoo ah waxaa ay ciyaarta ka helayaan raaxo ama qanacsanaan.
- Qaarkood waxay u ciyaaraan qaa laablakac ahaan ah.

Waa maxay sababta ciyaarista ciyaaraha lacagta loogu soo rogay xadaynta da’da?

Sida uu dhigaayo sharciga dalkaan Finland lama oggola in dhallinyarada da’doodu ka hooseyso 18-ka sano ay ciyaaraan ciyaaraha lacagta.

Ujeedada diidmada laga leeyahay waa in dhallinyarada laga badbaadiyo dhibaatada ciyaaraha lacagta. Diidmadaas waxaa ay si cad u yaraysay ciyaaristii dhallinyarada ay ciyaari lahaayeen noocyadaas ciyaaraha lacagta ah. Haddii ciyaarsita ciyaaraha lacagta lagu bilaabo dhallinyarannimo, arrinkaas waxaa dhibaato ka soo gaari kartaa marka uu qofku weynaado.

Ciyaaraha lacagta waxaa laga helayaa dukaamada, kasiinooyinka iyo hoolalka ciyaarta. Dadka goobahaas iska leh ayaa ilaalinaya, in dhallinyarada da’dodu ka hooseyso aysan halkaas ku ciyaarin.

Sidee ayay dhibaato uga imaanaysa ciyaaraha lacagta?

Sida badan ciyaaraha lacagta wax dhibaato ah ma lahan, haddii qofka ciyaaraaya uu ciyaaro waqti yar oo dhif ah.

Dadka qorsheeyay ciyaaraha lacagta waxaa ay isticmaalaan qaabab kala duwan, si ay dadka ciyaaraya u ciyaaraan marar badan. Dadka qabanqaabiya ciyaaraha lacagta waxaa ay dadka ku soo jiitaan xayaysiiska si ay u ciyaaraan ciyaaraha lacagta. Xayaysiiska waxaa lagu sheegayaa tusaale ahaan ”adigu waxaad ku guulaysan kartaa lacag aad u fara badan”. Ciyaaraha lacagta waxaa loo qorsheeyay qaab ah, in uusan qofku ogaanayn lacagta ka baxaysa ama mishiinku ka cunaayo.

Qaar badan oo ka mid ah ciyaaraha lacagta waxaa ay leeyihiin nalal iyo codad qofka ku soo jiidaayaa inuu sii wado ciyaarta. Waana sababtaas midda keeni karta in qofka ciyaaraya uu in badan khasaaro, laakiin islamarkiiba ma uu ogaanaayo.



Haddii ciyaaryahanku uu ciyaaro wax badan, ciyaarta ciyaaraha lacagtana ay sii kororto, waxaa dhici karta in ciyaaristeeda ay dhibaato ka timaaddo.

Ciyaarista ciyaarta lacagaha waa dhibaato, haddii ciyaaristu ay dhibaato ku tahay nolasha kale ee ciyaaryahanka. Hiwaayadda fiican waxaa ay isku beddeli kartaa dhaqan ama caado ay ka dhalato waxyaabo aan wanaagsanayn.

Waxyaabahaas aan wanaagsanayn waxaa ay u muuqan karaan qaabab kala duwan, qofka ciyaaraya lacag fara badan ayuu ku bixinayaa ciyaarista. Ciyaaryahanka waxaa lagu yeelanayaa deyn fara badan. Ciyaarista ciyaarta lacagaha waxaa ku baxaaya waqti fara badan. Waxaana markaas dhacaysa in qofka ciyaaryahanka ah uu waqti u heli waayo qoyskiisa ama saaxiibbadiis.

Ciyaaraa lacagta waxaa ka imaan kara qaab ah, in ciyaaryahanku uu ka cararo dhibaatooyinkiisa u gaarka ah. Dhibaatooyinkaas waxaa ka mid ah kelinnimo ama qashqashaaddda. Dhibaatooyinkaas waxaa ay ka jiri karaan iskuulka dhexdiisa, shaqada, guriga ama xiriirka lammaanaha. Ciyaaryahanku waxaa uu ciyaaraha lacagta ka raadinayaa firfricooni, marka uu niyadjabsan yahay. Si kastaba ciyaarista ciyaarta lacagta ma xallinayso dhibaatooyinkaas jira.



Maxaa loola jeedaa qabatinka ciyaaraha lacagta?

Ciyaaryahanka ciyaaraha lacagta waxaa dhici karta in uu qabatimo ciyaaraha lacagta.

Waxaana uu ciyaaryahanku dareemayaa in ay khasab ku tahay inuu ciyaaro ciyaaraha lacagta. Waxaana ciyaaryahanku mar kasta uu ku fekerayaa ciyaarista ciyaaraha lacagta. Waxa kaliya ee uu doonaayo waa in uu ciyaaro. Mana kala jecla inuu guulaysto iyo inuu khasaaro midkoodna. Mana uu awoodo inuu iska joojiyo, si kasta oo uu ogyahay in ciyaarista ciyaaraha lacagta ay ku keeneyso isaga dhibaatooyin fara badan.

Qofka ciyaaraha lacagta ciyaaraa waa ay ku adag tahay in uu caawimaad dalbado, waayo waxaa dhici karta inuu dareemaayo dambiilennimo.

Waa maxay arrimaha keenaaya in si fudud loo qabatimo ciyaaraha lacagta?

Dhammaan ciyaaraha lacagta waxaa ay keeni karaaan qabatin. Laakiin qabatinka qaar ka mid ah ciyaaraha lacagta waxaa ay ku dhashaan si ka fudud sida kuwa kale.

Qabitaanka waxaa uu si fudud uga dhashaa ciyaaraha uu qofku sida dhakhsaha ah guusha ku gaaro. Ciyaaryahanku mararka qaarkood wuxuu ku guuleystaa lacag. Guushaasna waxaa ay keentaa dareen farxadeed oo xoog leh. Ciyaaryahanka wuxuu isku dayayaa in uu guuleysto, oo in badan uu helo wax farxad geliya.

Mishiinnada ciyaaraha lacagta si fudud ayaa loo qabatimayaa. Qabatinka waxaa uu si fudud ugu dhashaa ciyaaraha lacagta, ee laga ciyaaro internetka. Tusaale ahaan waxaa ciyaartaas lacagta ka mid ah tan loo yaqaan khamaarka netka (nettipokeri). Haddii natiijada qiimaha leh ama guusha ay khasab noqoto in la sugo muddo dheer, qabatinka wuxuu ku dhalanayaa si tartiib ah. Waxaana tusaale ahaan nooca ciyaartaas lacagta ka mid ah tan loo yaqaan bakhtiyaanasiibka lootada. Laakiin lootada laftigeeda waxaa ay keeni kartaa qabatin. Ciyaaraha lacagta waxaa markaas ku luma lacagta.

Waxaa jira qaabab kala duwan oo ciyaarista ciyaaraha lacagta aad uga dhigi karto mid macquul ah, waxaadna adigoo qaababkaas kaashanaaya aad xakamayn kartaa ciyaaristaada ciyaaraha lacagta. Qaababkaas waxaa loogu yeeraa magaca ah ” Oma-apu” (Is-caawin).

Oma-apu (Is-caawin)

1. Xadee waqtiga ciyaarta iyo isticmaalka lacagta. Qaabab kala duwan ayaad ku xadidi kartaa waqtiga ciyaarta iyo isticmaalka lacagtaba. Waxaad horey u sii go’aansataa, lacag intee le’eg ayaa u isticmaalaysaa ciyaarta. Waligaa dad kale ha ka soo deynsan lacag aad ku ciyaarto. Waxaad qaadataa oo kaliya lacagta kaashka ama caddaanka ah ee aad markaa u baahan tahay. Amaba wax lacag ah oo kaash ah marnaba ha qaadan. Halkii marba wax xoogaa yar ciyaar. Biririf ama nasasho ka gal ciyaarista ciyaaraha lacagta. Waxaad telefoonka gacanta ama saacadda ku xirataa dhawaaqa digniinta leh ee kuu sheegaaya joojinta ciyaarta.

2. Go’aan ka gaar wixii aad ku beddeli lahayd ciyaaraha lacagta, go’aan ka gaar inaad yarayso ciyaarista ciyaaraha lacagta. Waxaad go’aankaaga u sheegtaa qofka ehel ahaan kuu dhow, kana codso isaga inuu kugu dhiirriggeliyo sidii aad go’aankaaga ugu taagnaan lahayd. Waxaad samaysaa maalin ama toddobaad aad waqtigaaga ku qaadanayso ciyaar la’aan. Maxaa kale oo waxqabasho ah ayaad allifan kartaa si aad u samayso? Xaggee ka heli kartaa wax ku farxad geliya, iyo xaalad wanaagsan oo aad ku jirto?

3. Jooji gabiahaanba ciyaarista ciyaaraha lacagta. Kaarkaaga bankiga ama kan khamaarka Veikaus-ka waxaad ka xirtaa ciyaarista. Weydii qof aad ku kalsoon tahay sida loo sameeyo. Markaas kaarka bankiga ama kan Veikkaus-ka ee khamaarka laguma ciyaari karo khamaarka mishiinnada ama ciyaaraha lacagta toona. Ku xir kombiyuutarka iyo telefoonka gacanta barnaamijka kaa

horistaagaaya inaad ku ciyaarto ciyaaraha lacagta ee dhinaca internetka. Iska ilaali inaad tagto goobaha ay yaallaan ciyaaraha lacagta. Dukaanka waxaad ka gashaa dhinaca aadan ku arkaynin mishiinnada ciyaaraha lacagta.

Haddii barnaamijka oma-apu (is-caawi) uu kugu filnaan waayo, Waxaad dhibaatada arrinkaan u sheegtaa qof aad ku kalsoon tahay oo kuu dhow adiga. Dadka kale waxaad ka heli kartaa caawimaad. Caawimaadda noocaas oo kale ah waxaa loogu yeeraa caawimaadda ehelka (lähiapu) ama caawimaadda bannaanka ka imaanaysa (etäapu).

Caawimaadda ehelka

Caawimaadda ehelka waxaa loola jeedaa, in aad caawimaad iyo taageero ka codsan kartid saaxiibkaa ama ehelkaaga. Sidaan soo socota ayaad ehelkaaga caawimaad uga heli kartaa:
- La hadal qofka kuu dhow ama shaqaalaha ah, ee aad ku kalsoon tahay. Waxaana ay tusaale ahaan dadkaas noqon karaan, hagaha degaanka, macallinka machadka ama kalkaalisada caafimaadka.
– Ka qaybqaado kooxda taageerada ee degmadaada. Waxaad halkaas caawimaad ka heleysaa dad iyaguba ay hore u haysatay dhibaatooyinka la xiriira ciyaarista ciyaaraha lacagta.

Caawimaadda bannaanka (etäapu)

Caawimaadda bannaanka waxaa ka mid ah adeegyada telefoonka, koorasyada dhanka internetka iyo macluumaad, kuwaasoo aad caawimaad ka heli karto.

Dhammaan kuwaas aan soo sheegnay waxaad ka heli kartaa dhanka internetka. Sidoo kale waxaad ka wici kartaa telefoonka. Telefoonka caawinta khamaariistaha Telefoon: **0800 100 101** Waxaad wici kartaa maalmaha shaqada, saacadda 12-18. Waxaad wici kartaa adigoo aan magacaaga sheegin. Wicitaanku waa mid lacag la'aan ama bilaash ah. Waxaad weydin kartaa caawimaad noocee ah ayaad ka heleysaa degmaadaada. Waxaad kaloo adeeggaas telefoonka ka heleysaa kooxda taageerada, ee ku kulma degmadaada.

Mashruuca Hadiya ee ururuka EHYT ry waxaa uu leeyahay telefoonka caawimaadda ee PuhelinHelppi, waxaa uu furan yahay khamiis walba, saacadda 14-18. Telefoonka adeegga ee luqadda carabiga **0800 955 20**, telefoonka adeegga ee luqadda Soomaaliga **0800 955 22.** Waxaad soo wici kartaa, adigoo aan magacaaga sheegin. Soo wicitaanku waa lacag la'aan.

Macluumaadkan waxaa isagoo luqad fudud ku qoran soo saaray ururka EHYT ry iyo ururka Kehitysvammaliitto ry: mashruca SELVIS- (2018-2021). Habaynta qoraallada iyo u turjumistooda luqadaha soomaaliga iyo carabiga, waxaa ka mas'uul ah mashruuca Hadiya ee ururka EHYT ry (2020-2023). Telefoonka caawinta ee mashruuca Hadiya, waxaa isagoo tijaabo ahaan ah uu furnaan doonaa illaa iyo dhammaadka sannadka 2021. www.ehyt.fi

Lähde: SELVIS-hanke 2021, *ehyt.fi/selvis*

Kuvat ja taitto: Carnivore Oy, Freepik